

Talo-siinta miisaaniyadda iyo amaahda

Adiga u baahan talo-siin ku saabsan
arimaha dhaqaalaha shakhsi



Talo-siinta miisaaniyadda iyo amaahda

Nagama heleysid kaalmo dhaqaale, balse waxan ku siin karnaa talo-siin kaa caawin karta sidi aad dhaqaalahaaga shakhsi ugu heli laheyd dheelitir.

Waxan kaa caawineynaa:

- baaritaanka dhibaatada
- eegid dhaqaalaha shakhsi iyo sameyn warbixin koo ban ee dhaqaalaha
- talo-siin sidi aad u maareyn laheyd dhibaatada amaahdaada
- soo saarid bandhig qorshe amaah bixin iyo haddii loo baahdo xiriir/la xaajood cidda amaahda kugu leh
- siin warbixin, talo iyo gargaar xilliga nadiifinta deynta

Gargaarkeenu waa lacag la'aan waxeynuna ku shaqeynaa qaab xog-qarin.



Nala soo xiriir

Ma doonaysaa inaad la kulanto la taliye, naga soo wac taleefanka 033-35 75 95 markaa ayaan kuu qabanaynaa balan ah booqashada ugu horaysa. Hadiise aad ka jeceshahay inaad buuxisid arjiga internetka (E-blankett) waxaad ka helaysaa boras.se/skuldradgivning. Ka dib anaga ayaa kula soo xiriirayna oo balan booqasho kuu qabanyana.


Si aad u hesho talo-siin saxa inti macquula, horey u soo qaado warbixinta dhamaan dhaqaalaha guud ee qoyska, kharashka ku baxa guriga, deymaha iyo wixi kaloo muhim u ah dhaqaalahaaga.

Waxaad naga heleysaa Stadshuset ee Kungsgatan 55, Borås. Nagala soo xiriir telefoon lambarka 033-35 75 95 ama e-maylka **budget@boras.se**

Ma lihin wakhtiyo go'an ee telefoon balse waxa hubaala inaad na heleyso isniin, arbaco iyo khamiis saacadda 9:30-16:00. Wax intaa dhaafsan ee ku saabsan talo-siinta miisaaniyadda iyo amaahda waxad ka aqrisan kartaa bogga internetka **boras.se/skuldradgivning**

Talo-siinta miisaaniyadda iyo amaahada waxa wada bixiyo magaalada Borås iyo degmooyinka Bollebygd, Svenljunga, Tranemo iyo Ulricehamn.

- = Halkan Borås ayaad ka heleysaa talo-siinta miisa-niyadda iyo amaahda (Adarees: Kungsgatan 55).



BORÅS STAD

MILJÖFÖRVALTNINGEN

Adarees boosto 501 80 Borås **Adarees booqasho** Sturegatan 42
Telefoon 033-35 30 00 **e-post** miljo@boras.se **Bog internet** boras.se